



Ministry of Security and DDR
Puntland State of Somalia
Garowe

WAR SAXAAFADEED

27 May 2012

Ciidanka Badda Puntland PMPF oo Soo Qabqabtay 11-burcad badeed

Cutubyo ka tirsan Ciidamada Booliska Badda Puntland (PMPF) ayaa 26 May 2012 waxay hawlgal ku gaareen degmada Xaafuun ee gobolka Karkaar waxaana hogaaminayey Taliyaha Ciidanka PMPF Col.Cabdirisaaq Diiriye Faarax oo ay weheliyaan Wasiirka Amniga iyo Hubka dhigista Dowladda Puntland Gen. Khaliif Ciise Mudan, Taliyaha Booliska Puntland Col. Maxamed Siciid Jaqanaf iyo Taliye-ku-xigeenka Booliska Puntland Col. Muxyidiin Axmed Muuse.

Saaka (27 May 2012) abaare 10:30 ayaa hawlgal Ciidamada PMPF ay ka sameeyeen aaga Xaafuun waxay ku soo qabteen 11 nin oo burcad badeed ah oo uu hogaaminayey Maxamed Maxamuud Maxamed Xasan (Dhafoor) oo ah nin ku caanbaxay ka qowleysiga xeebaha Badweynta Hindiya iyo Gacanka Cadmeed in badana Dowladu ku raad joogtey.

Dhafoor waxa uu ku lug lahaa jidgooyo horey Ciidamada Amniga ee Dowladda Puntland loogu dhigey degaanka Hul-Caanood March 2011 halkaasi oo ku dhinteen 5 askari oo ka tirsan Ciidamada kuna dhaawacmen 8 kale islamarkaasna ku burburiyeen qalab ciidan.

Dhafoor waxa uu ka tirsanaa ragii burcada ahaa ee afduubka u haystey qoyskii u dhashey dalka Denmark.

Kooxdan burcada ah ayaa dhinaca kale lagu soo qabtay gaari ay wateen oo nooca Toyota Surf ah, 7 qori oo AK47 ah iyo boobe culus.

Ministry of Security and DDR
Puntland State of Somalia